# Cirbada suuxinta ee lafdhabarta laga qaato inta qaliinka lagu gudo jiro iyo kadiba

Buug yarahan waxa uu sharaxayaa waxa aad filan karto hadii aad doorato in aad qaadato cirbada suuxinta ee laga qaato lafdhabarta ee xanuun baabi'iyaha ah inta lagu jiro Qalliinka iyo kadiba. Waxaana qoray dhakhaatiirta suuxinta u xil saaran, bukaanada iyo wakiilada bukaanada, iyagoo wada shaqeynaya.

## Hordhac

Buug-yarahaan waxa uu sharaxayaa:

- waa maxay cirbada suuxinta ee lafdhabarta laga qaato
- goormaa la isticmaalaa
- waa maxay faa'iidada aad ka heli karto markaad qaadato cirbadaas qaliinkaaga
- sida ay u shaqayso iyo waxa aad ka filan karto markaad qaadato
- Khataraha iyo go'aan gaaris la isla wadaago.

## Waa maxay cirbada suuxintu?

Cirbada Suuxintu waa cirbad suxisa qaybjirka ah laga qaato dhabarka iyadoo lagu mudayo dhabarka cirbad wadata tubo dhuuban oo jilicsan (catheter) si ay kalkaalisa kaaga siiso waxii dawooyin xanuun baabiya ah iyo cirbada suuxdintaba. Waxaa inta badan loo isticmaala xanuun dhimista dhalmada.

Waxaa loo isticmaali karaa cirbadan suuxinta inta lagu jiro qalliinka (iyadoo lala isticmaalayo cirbada kale ee suuxinta jirka oo dhan ama la'aanteeda) waxaa kaloo loo isticmali karaa maaraynta xanuunka qalliinka ka bacdi, ama labadabadaa xaaladba.

Tubadaa yarna way ku jiri kartaa dhabarkaaga xitaa qalliinka ka bacdi waxaana loo isticmaali karaa in lagugu siiyo xanuun baabi'iye, iyadoo la isticmaalayo cirbada kalee silingaha wadata ama mida tubadaba kuxiran. Qaar ka mid ah tubooyinkaas suuxinta

dhabarka ah ayaa sidoo kale leh badhan aad adigaba ka iscticmaali karto xanuun baabi'iyahaaga. Tubooyinkaa dawada laga qaato ayaa waxaa kuxiran badhano kuu qiyaasaya cabirka aadan dhaafsiin karin in aad ka isticmaasho dawada xanuun baabiyaha si looga hortago inaad isa siiso daawo xanuun baabbi'iye kaa tan badan, kooxda daryeelka caafimaad ayaa si joogto ah kuula socon doona xaaladada.

Cirbadan Suuxinta lafdhabarta laga qaato ayaa inta badan loo isticmaali karaa gaar ahaanteeda ama iyadoo lala isticmaalayo mida suuxin guud marka la sameynayo qalliino kala duwan. tusaale; qalliinka kansarka (gaar ahaan kansarka sambabada) iyo qalliinada kaadimareenka (tusaale; kalyaha iyo kaadi haysta).

## Waa maxay faa'idooyinka laga helayo cirbada suuxinta lafdhabarta?

Qallinaada qaarkood cirbada suuxinta lafdhabartu waxay leedahay xanuun baabi'iye ka fiican hababka kale, gaar ahaan markaad si qoto dheer u neefsato, u qufacdo ama aad sariirta dusheeda isku rog rogto.

Hababka kale ee xanuun baabi'inta waxay isticmaalaan dawada loo yaqaan morphine ama daawooyin la mid ah (opiods). Kuwani waa xanuun baabi'iyeyaal xoog badan, laakiin waxay yeelan karaan dhibaatooyin la socda oo ay ka mid yihiin lalabo, hurdo, calool istaag iyo la qabsi (haddii la isticmaalo mudo dheer). Dadka qaar ayaa wax kala garan waaya marka lasiiyo xanuun baabi'iyaha morphine.

Waxaa sidoo kale jira cadaymo muujinaya in cirbada suuxinta lafdhabarta ay yarayso khataraha qaar ee kadhalan kara qalliinka,oo ay kamid tahay qulqulka dhiiga ee lugaha ama sambabada oo guntimo yeesha, ama laabta oo uu kudhasho caabuq, iyo khataraha kalee laxiriira marka bukaanka dhiig looshubayo.

## Qof kasta ma qaadan karaa cirbada suuxinta lafdhabarta?

Waa muhim inaad qaadato cirbada suuxinta lafdhabarka laga qaato qaliinada qaarkood, bukaanada qaarna maaha suurtagal inayba qaataanba. Dakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doona hadii loo baahdo. Waxaa laga yaabaa in ay adiga aadan qaadan karin cirbada suuxinta dhabarka laga qaato :

- marka aad qaadato dawooyinka dhiiga khafiifiya, sida warfarin
- ama marka dhiigaagu uu san u fariisanayn sidii caadiga ahayd
- amaba waxaad xasaasiyad ku qabtaaba cirbada suuxinta
- ama xaga lafdhabarka ayaad burbur iyo naafo weyn kuleedahay
- aad qabto caabuqa dhabarka
- ama hada kahor ayaa lagugu sameeyay qaliin lafdhabarta ah biro ayaa lagaliyay laf dhabarkaaga.

## Sidee loo sameeyaa cirbada suuxinta lafdhabarta?

Cirbada suuxinta lafdhabarta waxaa lagu diri karaa:

- Adigoo si buuxda usoo jeedo
- ayadoo lagu siinaayo daawooyin ku suuxinaya (daawooyin hurdo kuu keenaya iyo dabacsanaan).

Dhakhtarkaaga suuxinta waxa u kala hadli doona nooca adiga aadka kugu fiican. Talaabooyinka loo qaato suuxinta laf dhabarta waa:

- Dhaktarka suuxdinta ama kalkaaliyaha wuxuu marka hore cabiri doonaa heerka garaaca wadnahaaga, cadaadiska dhiigaaga iyo heerarka ogsijiinta jirkaaga iyo wixii kalee aalado ah oo loo baahdo
- tubada silinga ah (ee biyaha dawada ah wadato) ayaa la gelinayaa xididka cududa si uu jirkaaga dheecaan ugalo
- waxaa lagu weydiin doonaa inaad fadhisatid ama u jiifsatid dhinacaaga
- waxaa lagaa caawin doonaa in aad hore u foorarsato, adigoo dhabarka hoos u qalloocin doona intii aad awoodid - fiiri sawirka kore
- dhakhtarka suuxiinta ayaa dhabarkaaga ku nadiifin doona sheyga jeermiska dila ee layiraahdo antiseptic
- duritaan yar oo dawada suuxinta ah ayaa la siyaa si loo kabuubiyo maqaarka
- cirbad ayaa loo isticmaali doonaa si tubada jilicsan loo geliyo dhabarkaaga. CIrbada ayaa la saarayaa, taasoo dhabarkaaga kaga tagaysa tubada jilicsan oo kaliya, kadibna tubadii waxaa lagu adkaynayaa faashad xabag wadata. Dhawr iskuday ayaa loo baahan karaa xaaladaha qaar
- tubooyinka lagaliiyo kaadimareenka ayaa inta badan la geliyaa si kaadida looga saaro kaadi haystaada markaad qaadanayso cirbada suuxinta lafdhabarta. Dhakhtarka suuxinta ayaa kaali hadli doona adiga xulashooyinka.

### Muxuu dareema qofku marka uu qaato cirbadaas?

Marka lagu gu mudo cirbada suuxinta waxaad dareemi doontaa xoogaa kulayl ah maqaarka. Waxaad kaloo dareemi karta marka lagu gu mudayo cirba laakiin marka cirbada iyo tubada yar lagugu rakibo xanuunka waa iska fududaanaya.

Mararka qaarkood, dareen xoogan,sida shooga korontada oo kale ah , ayaa la dareemaa. Hadday tani dhacdo, waxay u muuqan doontaa dhakhtarkaaga suuxinta, laakiin waa inaad sidoo kale la socodsiisa shoogaas. Waxaa laga yaabaa inay ku weydiiyaan halka aad ka dareentay shoogaas.

Dareen diirimaadka iyo kabuubyada ayaa si tartiib ah u koraya kadib marka daawada suuxinta lagaa siiyo tubada yar. Noocyada qaarkood ee suuxinta lafdhabarta, lugahaagu waxa laga yaabaa inay dareemaan culeys oo ay adkaadaan inay dhaqaaqaan. Tani waa mid caadi ah.

Guud ahaan, dadka intooda badan uma arkaan in dareenkan uu yahay mid aan fiicnayn. Dareenka iyo dhaqdhaqaaqa ayaa caadi ku soo laaban doona marka la joojiyo cirbada suuxinta lafdhabarta. Xaaladaha qaar, dhawr iskuday ayaa loo baahan karaa si tubada yar ee suuxinta lafdhabarta loo geliyo meesha saxda.

## Xarunta caafimaad ee qiimeynta qalliinka ka hor (qiimaynta hordhaca)

Haddii aad ubalansantahy qaliin waxaa laga yaabaa in laguugu yeero rugta caafimaadka ee qiimeynta ka hor qaliinka dhawr isbuuc ama maalmo ka hor qaliinkaaga. Mararka qaar qalliinka fudud, waxaa kusoo wici doona kalkaalisada caafimaadka si ay kuu waydiiso su'aalo dheeraad ah.

Fadlan soo qaado:

- Soo qaado dhamaan dawooyinka aad hada qaadato iyagoo ku jira galkooda oo dhamaystiran
- Haddii aad qaadato wax daawo ah si aad u khafiifiso dhiiggaaga, waxaa muhiim ah in kooxda qiimeynta ka hor ay ogaadaan kana doodaan haddii aad u baahan tahay inaad joojiso qaadashada daawooyinkan ka hor qalliinkaaga
- sidoo kale haday jiraan warbixin ku saabsan hadaad hada ka hor samaysay baaritaano ama daaweyn aad ka qaadatay cisbitaallada kale
- macluumaadka ku saabsan wax kastoo dhibaato oo hada ka hor kasoo gaaray adiga ama qoyskaagaba markii ay cirbada suuxdinta ah ay qaateen
- cabirka dhiigaaga ee aad dhowaan iska qaadday.

Waxaad la kulmi kartaa dhakhtarka suuxinta ee cisbitaalka. Haddii kale waxaad kula kulmi doontaa dhakhtarkaaga suuxinta ee cisbitaalka maalinta qalliinkaaga.

## Halista iyo go'aan gaaris leysla wadaago

Suuxinta casriga ah aad bay ammaan u tahay. Waxaa jira wax yeelooyin yar oo inta badan ka imaada dawooyinka suuxinta ama qalabka loo adeegsado, kuwaas oo badanaa ahayn wax aad u daran ama u waara. Shaqsiyaadku way ku kala duwanaan doonaan halisaha waxayna ku xirnaan doontaa qaabka iyo farsamada loo isticmaalo cirbada suuxinta.

Waxaa jira xooga wax yeelo ah oo caadi ah oo la xiriira suuxinta lafdhabarta, oo ay kamid yihiin:

- Cadaadiska dhiigga oo hoos udhaca
- Kaadida oo adkaata
- Maqaarka oo cuncun yeesha
- dareemitaan xanuun iyo caajis
- Madax xanuun.

Kiisas dhif ah suuxinta lafdhabaru waxay sababi kartaa dhaawac neerfaha taaso noqon karta mid ku meelgaadh ah ama joogto ah.

Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doona halisaha ay rumeysan yihiin inay adiga kuugu imaan karaan. Waxay kaala hadli doonaan oo kaliya khataraha aan caadiga ahayn haddii ay adiga kugu khuseeyaan.

Haddii aad rabto inaad akhrido faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan halisaha la xiriira suuxinta, fadlan booqo: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

## Go'aan gaaris leysla wadaago

Go'aan gaarista leysla wadaago waxay hubisaa in shakhsiyaadka la taageero si ay u gaaraan go'aamo iyaga ku habboon. Waa hab wada shaqayneed oo uu takhtarku ku taageero bukaanka si uu go'aan uga gaadho daawaynta.

Wada sheekeysigu waxa uu isku keenaa:

- khibrada dhakhtarka, sida fursadaha daawaynta, caddaynta, khatarta iyo faa'iidooyinka
- waxa uu bukaanku si fiican u garanayo: dookhooda, duruufahooda gaarka ah, yoolalka, habdhaqankooda iyo waxa ay aaminsan yihiin.

Wixii dheeraad ah ka hel: www.england.nhs.uk/personalisedcare/shared-decision-making

Waa kuwan qaar ka mid ah qalabyada aad isticmaali karto si aad sida ugu fiican uga faa'iidaysato wada-hadalladaada aad la yeelato takhtarkaaga suuxinta ama qiimaynta qalliinka ka hor:

### Doorashada saxda ah Wisely UK BRAN framework

U isticmaal tan xasuusin ahaan si aad u weydiiso su'aalo ku saabsan daaweynta.
https://bit.ly/CWUK_leaflet

### waydii waxda caafimaadka ee NHS seddex su'aalood

Waxay siindoontaa xolashooyin badan oo ku saabsan daryeelkaaga caafimaad.
https://bit.ly/NHS_A3Qs

### Xarunta Daryeelka Qalliinka Ka Hor (CPOC)

CPOC waxay soo saartay filmiaan si ay kuugu sharaxdo waxa ay tahay go'aan qaadashada la isla wadaago.
www.cpoc.org.uk/shared-decision-making

# Su'aallaha aad jeclaan laheyd in aad weydiiso

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan suuxintaada, qor (waxaad isticmaali kartaa tusaalooyinka hoose kadibna ku darso su'aalahaahga meesha bannaan ee hoose). Haddii aad rabto inaad la hadasho dhakhtarka suuxinta kahor maalinta qalliinkaaga,la xiriir kooxda qiimaynta ka hor inta aan la gaarin qaliinka kuwas oo kuu diyaarin doona inaad taleefanka kula hadasho suuxiyaha ama aad ku aragtid xarunta caafimaadka.

**1. Maxaad iigula talinaysaa qaadashada cirbada suuxinta lafdhabarta?**
**2. Waa maxay faa'iidooyinka iyo khasaaraha ay suuxinta lafdhabartu ii leedahay?**
**3. Ma jiraan xulashooyin beddel noqon kara?**

## Afeefasho

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

# Noo sheeg sida aay kula tahay

Haddii aad hayso wax talooyin ah, fadlan iimaylkan noogu soo dir:
patientinformation@rcoa.ac.uk

**Kulliyadda Royal ee taba barka dhakhaatiirta suuxinta**
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

## www.rcoa.ac.uk

### Daabacaadii lixaad, Juun 2023

Buug yarahan waxaa dib u eegis iyo dulmar lagu samay doonaa saddex sano kadib laga bilaabo taariikhda la daabacay.

**© 2023 Kulliyadda Royal ee tababarka Dhakhaatiirta Suuxinta**
Buug yarahan waxaa laga baxsan karaa nuqulo koobi ah waa hadii ay ujeedadu tahay in uu qofka bukaanka ahi uu ka helo waxii xog ah. waxii qoraal ah ama xog ah eed qorayso ama sheegayso eed buuga yaraha kasoo qaadatay Fadlan sheeg inaad isaga kasoo qaadatay. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan aad ku dabacato qoraale kale, waa inaad heshaa ogolaansho waana inaad kasaartaa qoraalkaaga waxii magaca ama calaamado, astaanta iyo sawirro ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee u baahantahay, fadlan nala soo xiriir.